

1. Caadiyan dhagaysiyadu waxay qaataan min 1 ilaa 2 saacadood.
2. Dhagaysiyada waxa lagu qaban karaa qofka hortiisa ama telefon. Dhagaysiga telefonku wuxu ku xun yahay qolooyinka oo aan la kulmayn qofka ay saamaysay go'aanka laga racfaanayaa ama aan arki karin qofka kale ekaanshihiisa aan hadalka ahayn.. U-ddodahaaga Arc wuxu codsan karaa in dhagaysiga lagu qabto qofka hortiisa.
3. Dhagaysiga qofku joogaa waxa lagu qabtaa qol fadhi oo kale.
4. Garsoore ayaa dhagaysiga wada.
5. Garsooraha ayaa soo bandhiga dhagaysiga oo dhaariya qof kasta – dhammaan dhagaysigana cajalad ayaa lagu duubaa.
6. Qawaaniinta caddaynta laguma dhaqmo. Ku-tidhi ku-teenta waa la ogol yahay – waad ka hadli kartaa waxa dad kale yidhi, haddii aanay xataa joogin. Looma baahna liistada markhaatiyaasha.
7. Garsooraha ayaa cayima qofka hadalka ku horraynaya. Caadiyan wakaalada ficilka keentay ayaa horraysa (qofkii gaadhay go'aanka keenay racfaanka). U-ddodahaaga ayaa warsan doona fursad uu ku dhiibo hadal furitaan ah kahor inta aanay degmadu sii wadin.
 - i) Wakiilka wakaaladu waa inuu si cad oo gaara u sheegaa sababta iyo salka go'aankooda (dhagayso oo qoraalo ka qaado).
 - ii) Xaq ayaad u leedahay inaad su'aasho markhatiyadooda. Markay tahay tarahaaga, xaq ayey u leeyihiin inay su'aalaan markhaatigaaga.
8. Garsooruhuu markasta su'aal ayuu soo-jeedin karaa.
9. U-doodaha Arc Greater Twin Cities iyo adiga ayaa wadajir uga shaqayn doona diyaarinta iyo u keenista baqshad caddaymo ah garsooraha iyo wakiilka wakaalada, oo ay ku jirto sidaan u aragto kiiska oo ay ka mid yihiin:
 - i) Gundhiga/xaqiiqada
 - ii) Arrinta
 - iii) Sharciga
 - iv) Gunaanadka
10. Dhammaan caddaymaha muhiimka ah waa in la keenaa dhagaysiga maadaama aan la ogolayn caddayn cusub dhagaysiga kadib, iyada oo rikoodhka lagu daayo furitaan mooyaane.
11. Markuu dhagaysigu dhamaado, u-doodahaaga ayaa garsooraha warsan doona inuu dacwada muddo danbe (1 toddobaad) ay sii furnaato si qoraal loo qori karo oo loo gudbin karo dib u sheegaysa dacwadaada, laga qaatay dhagaysiga.

Wixii macluumaad dheeraad ama adeegyo u-doodid ah, kala xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.